

DIBLOOMADA DUGSIGA SARE
EE GOBOLKA WASHINGTON

DABACSAN. WAX-KU-OOL AH. LA KASBAN KARO.

Heer kasta oo waxbarashadooda ah, ardaydu waxay helaan fasalo waxbarasho iyo kuwa shakhsii ahaaneed oo ku habboon oo ka caawin doona inay u diyaargaroobaan noloshooda ka danbaysay dugsiga sare.

Haddii ay diyaar u yihiiin inay noqdaan dhakhtar ama makaanik, ay ciidamada ku biiraan ama ku biiraan waaxda teknoolojiyadda, ardayda Gobolka Washington waxay leeyihiin ikhtiyaaro aad u badan xagga shaqada mustaqbalka dugsiga sare kadib. Dibloomada Dugsiga Sare ee Gobolka Washington waxay siisaa ardayda xirfadaha iyo aqoonta ay u baahan yihii si ay himiladooda u raadsadaan oo ay u soo bandhigaan jidka ay doonaan haddii ay raacaan wixii ka danbeeya dugsiga sare, ay diyaar u noqdaan inay shaqeeyaan, waxbarashada sii wataan, iyo fursadaha kale.

Ardaydu waxay helaan 17 dhibcood oo aasaasi ah oo xisaabta, Ingiriisiga, sayniska, cilmiga bulshada, farshaxanka, jimicsiga, iyo mihnadda, iyo waxbarashada farsamada gacanta. Waxaa sidoo kale jira toddoba dhibcood oo la dooran karo oo ay kamid yihiiin saddex dhibco jidka shakhsii ahaaneed ah, kuwaas oo waafaqsan yoolalka mihnadda ardayda iyo Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixii Ka Dambeeya.



QORSHABA DUGSIGA SARE IYO KA DAMEEYA

Waxaa ka mid ah shuruudaha qaljinjabinta, dhammaan ardayda Gobolka Washington waxay samaystaan Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixii ka Dambeeya. Ardayda waxay sheegaan sida ay u buuxin doonaan shuruudaha qaljinjabinta dugsiga sare iyo waxa ay doonayaan inay qabtaan wixii intaa ka danbeeya qaljinjabinta. Ardaydu waxay bilaabaan inay curiyaan qorshahooda inta ay ku jiraan dugsiga dhexe. Kadibna ardaydu waxay kalbo wax ku kordhiyaan ama ka saaraan qorshayaashooda inta ay ku jiraan dugsiga sare, taas oo ku salaysan isbaddalka rabitaankooda iyo yoolalkooda.

KHAYRAADKA LOO ISTICMAALO QORSHAYNTA MUSTAQLBALKA ARDAYDA EE QALINJABINTA KADIB WAXAA KAMID AH:

- **Career Bridge**, kayd maclumaa ah oo la baadhi karo oo waxbarashada nolosha shaqo ah iyo saadaasha mushaharka qofku qaato www.careerbridge.wa.gov
- **Ready Set Grad**: Waxbarashada dugsiga sare iyo khayraadka qorshaynta ee fasalada 6-12: readysetgrad.wa.gov
- Qalabka barnaamijka tabobarka shaqada Washington's Labor & Industries: www.lni.wa.gov